



## **Kala tali waaladiinta waqti ka horeeyo furitaanka dugsiyada**

Qof walba aad ayuu ugu dadaalayay hubinta dib u furitaan badbaado ah ee dugsiyada oo loogu talloagalay shaqaalaha, ardayda iyo qoysaskooda.

Waxaa jirayo sharciyo cusub iyo jadwalo la raacayo, oo halkaas u yaalo inay qof walbo badbaado ku hayaan.

Inta badan ardayda waxay filanayaan inay dib ugu laabtaan dugsiya oo dareemaan farxad iyo reenreen. Qaarkood waxay dareemi karaan walaac yar ee ku saabsan ku laabashada. Taasi waa jawaab caadi ah ee waqtiga isbadelka. Inta badan waxay dib ugu xalismayaan markii ay u bartaan sharciyada cusub iyo jadwalada. Xasuusi iyaga filashooyinka wanaagsan ee ku laabashada – sida dib ugu xiranka saaxibada iyo dib uga qeybgalka howlaha dugsiya.

Gacmo dhaqashada wanaagsan waxay muhiim u ahaaneysaa ardayda oo dhan. Hubi in canugaaga garanayo inuu isticmaalo istiraasho lagu daboolo qufaca ama hindhista ama lagu qufaca ama lagu hindhiso curcurka.

Heerarka dugsiya hoose iyo waxbarashada dugsiya hoose dhaafsan, dugsiyada waxay gelinayaan nidaamyada ka fogaanshaha jirka.

Dugsiya hoose, carruurta yar laga yaabo inaysan u baahanin inay ku dhaqmaan ka fogaanshaha jir ahaanta, laakin waxaa lagu diyaarin karaa kooxyo. Waxaa sidoo kale jirayo sharciyo cusub ee ku saabsan ku dajinta iyo soo qaadida.

Shaqaalaha ku jiro dhammaan dugsiyada, iyo ardayda dugsiya hoose dhaafsan, waxaa looga baahanyahay inay xirtaan waji daboolashada halka ka fogaanshaha jir ahaanta ee 2 miitir aan la joogteyn karin.

Ku dhiiro geli canugaaga inuu lugeeyo ama ku wareeji dugsiya haddii ay suurtoagal tahay oo badbaado tahay in sidaas la sameeyo.

Gaadiidka dugsiya, ardayda waxay helayaan korsi loo qoondeeyay oo lagu isticmaalayo maalin walba iyo ardayda dugsiya hoose dhaafsan waxaa looga baahanayaa inay xirtaan maaskaraha wajiga markii ay sugayaan iyo markii ay saaranyihiin baska.

Dugsiyada waxay si toos ah kala xiriirayaan qoysaska wax ku saabsan dib u furida. Kaga wada hadlo guriga wax ku saabsan waxa laga filanayo markii dib loogu laabanayo dugsiga. Waa inaad ogeysiisaa dugsiga walaacyo walba ee aad ka qabtid waaya aragnimada waxbarashada canugaaga inta lagu jiro muddada xiritaanka dugsiga.

Diyaarsashada jadwalada caafimaadan waxay kugu caawineysaa saxiitaanka ku laabashada dugsiga. Ku dhiirogeli canugaaga inuu si tartiib ah loo baro jadwalada waqtiga jifka oo aad ugu dhow kuwa lagu isticmaalo inta lagu jiro muddada dugsiga.

Sidoo kale, ku caawi canugaaga inuu cuno cunto caafimaadan, jimicsi sameeyo oo dib ugu xirmo saaxibada.

Macalimiinta way fahamsanyihiin inaysan ahaanin mid sahlan in lagu barto guriga inta lagu jiro xiritaanada dugsiga oo waxay ku taageerayaan ardayda inay diyaar u noqdaan inay bartaan.

Qof walba ee qabo aastaamaha Covid-19, oo ay ku jiraan qandho, qufac, gaabashada neefsashada ama dhibaatooyinka neefsashada, ama lumitaanka ama isbadelka dareenkooda urta ama dhadhanka waa inaysan ka qeybgelin dugsiga. Fadlan soo wac dhaqtarkaaga oo raac jaheynta ka imaaneyso HSE oo is-gooniyeynta. Hubi in ardayda garaneyso in haddii ay ku dareemaan jiro dugsiga waa inay ugu sheegaan macalinkooda islamarkiiba.

Xasuuso waxaan dhammaanteen leenahay door aan ka ciyaarno inaan qof walba si badbaado ah dib ugu celino dugsiga.

Wixii dheeraad ah fiiri [gov.ie/backtoschool](http://gov.ie/backtoschool)